

SIYAASADA KAALMADA DHAQAALAHA <8173037>

LIFAAQA 1 AAD: Adeegyada Kharashkooda la daboolay iyo Kuwo aan la daboolin iyo Daryeel Bixiyaasha

Waxaa markii ugu dambeysay la cusbooneysiiday 4/29/2022

La daboolay

Khidmada Xarunta Bukaana socodka ee goobaha Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson
(Fred Hutchinson Cancer Center)

- SCCA South Lake Union
- Waaxda Wareegta ee Raajada Naaska ee Fred Hutchinson Cancer Center
- Fred Hutchinson Cancer Center ee UW Medicine - Northwest
- Fred Hutchinson Cancer Center ee EvergreenHealth
- Fred Hutchinson Cancer Center ee Overlake Medical Center
- Fred Hutchinson Cancer Center Peninsula
- Fred Hutchinson Cancer Center Issaquah
- Xarunta Proton ee Fred Hutchinson Cancer Center

Khidmada Xarunta Bukaana Jiifka ee Xarunta Isbitaalaha Kansarka Fred Hutchinson - UW
Medicine Montlake

Aan la daboolin

Maadaama ay qayb ka tahay daryeelka aad ku hesho Fred Hutchinson Cancer Center, waxaad adeegyo ka heli kartaa dhakhaatiirta caafimaadka ee xariirka la leh UW Medicine (UW Medicine, UWM), Dhakhaatiirta Jaamacada Washington (Washington Physicians, UWP), iyo/ama Isbitaalaha Carruurta Seattle (Seattle Children's Hospital, SCH). Abaalmarinadeena kaalmada dhaqaalaha laguma dabaqo kharashaadka la dulsaaro UWM, UWP, ama SHC. Ururadaan waxay meelmariyeen siyaasadooda kaalmada dhaqaalaha oo u gaar ah. Si toos ah ayaad ula xariiri kartaa ururadaan si aad u hesho macluumaad ku saabsan siyaasadaha kaalmada dhaqaalaha adoo la xariiriya:

- Xarunta Caafimaadka ee Jaamacada Washington: (206) 598-4320
- Dhakhaatiirta Jaamacada Washington: (206) 543-8606
- Harborview Medical Center (206) 7443084
- Seattle Children's Hospital: (206) 9873333

Marka laga imaado daryeel bixiyaasha caafimaadka kor lagu xusay ee aan kharashkooda la daboolin, daryeel bixiyashaan soo socda sidoo kale waxaa laga saaray abaalmarinada kaalmada dhaqaalaha Fred Hutchinson Cancer Center.

Khidmadaha Xirfadleyda iyo Xarunta Bukaana Jiifka iyo Bukaana Socodka ee la xariira Fred
Hutchinson Cancer Center Isbitaalada bulshada xiriirka la leh

- UW Medicine – Northwest
- EvergreenHealth
- Xarunta Caafimaadka ee Overlake
- Dhakhtarka Ilkaha ee UW

Sheybaarada tixraaca ee banaanka ee sida toos ah kharashkooda loogu dalacaayo caymiska bukaanka si loogu bixiyo kharashka dhakhtarka Fred Hutchinson Cancer Center – baaritaanada la dalbay (oo ay kujiraan, laakiin aan ku koobneyn kuwaan soo socda):

- Sheybaarka Caafimaadka ee UW
- LabCorp

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xariira in sheybaarka tixraaca ee banaanka ee aan lagu xusin kor kharashkiisa la daboolay iyo in kale fadlan la xariir La-taliyaha Dhaqaalaha ee Fred Hutchinson Cancer Center ood ka wici karto (206) 606-6226 ama lambarka bilaashka ah ee 1 (800) 304 -1763 dooro dookha 2 aad, ama iimayl codsi ah u dir fincounsel@fredhutch.org.